DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HABRAACA QARAN EE KA SAARIDDA DADKA HOYGA AMA DHULKA AY DEGGAN YIHIIN

# DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyey Habraacan oo lagu magacaabayo "Habraaca Qaran ee Ka Saaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay Deggan Yihiin, 2019"**

## Tusmo


ARAR........... ........ 4

QAYBA I – QODOBBO HORDHAC AH........ 6

1. Qeexitaanno........ 6

2. Xayndaabka iyo Ujeeddada ........ 7

QAYBTA II – SHURUUDAHA IYO HANNAANKA SHARCIGA AH EE KA SAARIDDA DADKA HOYGA IYO DHULKA AY DEGGAN YIHIIN........ 8

3. Shuruudaha Dhul iyo Hoy ka Saaridda Sharciga ah ........ 8

4. Badbaadiooyinka loo Baahan Yahay Marka Dadka Laga Saarayo Hoyga ama Dhulka ay Deggan Yihiin ........ 9

QABYTA III – HANNAANKA KA SAARIDDA DADKA HOYGA IYO DHULKA AY DEGGAN YIHIIN........10

5. Waajibnimada in la Ogaysiiyo Dadka ay Saamaynayso ........ 10

6. Waajibnimada Ogaysiiska iyo Qaabka Ogaysiiska........ 10

7. Xaqa Tallaabo Maamul oo Caddaalad ah, Dib-u-eegis Garsoor ama Racfaan ........ 11

8. Xaqa Kaalmo Sharci iyo Xog ........ 12

9. Unkidda Guddiga ka Saaridda Hoyga iyo Dhulka........ 12

10. Hannaanka ka Horreeya inta aan Dadka laga Saarin Hoyga iyo Dhulka ay deggan Yihiin.. 14

11. Hannaanka Marka Lagu Gudajro Ka Saaridda Dadka Hoyga iyo Dhulka ay Deggan Yihiin 14

12. Hannaanka marka Dadka Hoyga iyo Dhulka ay Deggan Yihiin laga Saaro ka bacdi........... 15

QAYBTA IV – QODOBBO GUUD IYO KUWO QUBANE AH........ 16

## ARAR

*Markay noqotay* masuuliyadda dawladda, sida uu qabo qodobka 12(2) ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, in dawladda aan laga rabin oo kaliya ka baaqsiga falal xad-gudub ku ah xuquuqaha, balse looga baahanyahay inay qaaddo tallaabooyin macquul ah oo ay kaga hortagayso in qof u gafo xaqa mid kale;

*Marka uu* qodobbka 33 ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah uu qof walba u dammaanad qaaday helista go'aan maamul oo ah sharci, macquulna ah oo loo agaasimay hannnaan xaq ah;

*Marka uu* qodobka 39 ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah (1) uu dawladda u igmaday xaqiijinta in sharcigu la yimaado hannaan waafiya oo ay xaqeeda sharci ku helayso ciddii xuquuqdeeda aadaninnimo loo gafo; (2) uu dawladda u igmaday damaannad qaadidda xuquuqda qaanuuniga ah ee ku aaddan sixidda xadgudubyada xuquuqda aadanaha oo ay muwaadiniintu heli karaan maxkamad ay si fudud oo siman dacwad uga furan karaan; oo (3) uuna dhigay in qof ama urur uu maxkamadda u tagi karo si uu u difaaco xuquuqaha cid kale oo aan iyadu difaacan karin;

*Iyadoo la tixgalinayo* baahida daran ee loo qabo in dadyawga nugul laga ilaaliyo xoogga looga saarayo dhulka ama hoyga ay deggan yihiin;

*Iyadoo la garawsanayo* in xoog uga saaridda dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin ay tahay xadgudub ka dhan ah xuquuqda aadanaha, ayna si toos ah ama si dadban uga hor imanayso heshiisyadan caalamiga ah ee ay ansixisay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

(b) Xaqa uu qof waliba u leeyahay hoy ku filan, sida uu dammaanad qaadayo qodobka 25aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha;

(t) Xaqa nolosha iyo xaqa nabad-galyada qofka ee ay dammanad qaadayaan qodobada 6(1) iyo 9(1) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Siyaasadeed iyo kuwa Madaniga ah;

(j) Xaqa halbeeg nololeed oo waafi ah, kaas oo ay ku jiraan xaqa hoy, cunto iyo fayodhawr ku filan sida uu dammaanad qaadayo qodobka 11aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan, iyo qaraarrada la xiriira ee uu soo saaray Golaha Xuquuqda Aadanaha;

(x) Xaqa helidda xuquuqda sharci oo wax ku ool ah oo lagu saxayo xadgudubyada xuquuqda aadanaha sida ay dammaanad qaadeen qodobbada 2, 3 iyo 26 ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga ah iyo kuwa Siyaasadeed;

(kh) Mabda'a 6aad ee Mabaadi'da Hagta Barakicinta Gudaha, kaas oo mamnuucaya barakicinta aan nidaam sharci ah loo marin oo dadka dalka gudihiisa ku barakacay looga saarayo hoygooda iyo meelaha ay deggan yihiin.;

(d) Qodobka 11(4) Heshiiska Midowga Afrika ee Difaacista iyo Taakulaynta Dadka ku Barakaca Dalkooda Gudihiisa ee Afrika (Axdiga Kampala), ee khuseeya waajibka dawladaha qaybta ka ah heshiiska ka saaran samaynta hab munaasab ah oo xeerinaya habraac fudud, markay daruuri noqoto, oo loogu talo galay xallinta khilaafaadka la xiriira hantida dadka ku barakaca gudaha dalka;

(r) Qodobka 27(3) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta, kaas oo u igmanaya dawladaha qaybta ka ah in, si waafaqsan duruufaha waddankooda iyo tabartooda, ay (i) qaadaan tallaabooyin munaasab ah oo lagu taakulaynayo waalidiinta iyo dadka kale ee ka masuulka ah carruurta; (ii) hirgaliyaan xaqan; iyo (ii) haddii loo baahdo inay fidiyaan kaalmo agab iyo barnaamijyo taakulayn, gaar ahaan nafaqaynta, huga iyo hoyga;

*Markuu* Guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan uu xaqa guriyayn waafiya (qodobka 11.1) uu ku fasiray sharxaadda guud ee 4 iyo 7; iyo

*Markuu* qodobka 99aad ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah uu Golaha Wasiirrada awood u siiyay arrimo ay ka mid tahay, (a) dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda; iyo (b) oggolaanshaha iyo fulinta xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda-

*Ayuu hadda* Golaha Wasiirradu ansixiyay habraacan soo socda:

# QAYBA I : QODOBBO HORDHAC AH

## 1. Qeexitaanno

Haddii dulucdu aanay si kale u baahan in loo fasiro, habraacani:

**"Hay'adda shaqada leh"** waxa uu ula jeeda hay'ad dawladeed ama aan dawli ahayn, maamul ama haya'd kale oo fulineed oo ka masuul ah guri ama dhul uu khuseeyo amar dad looga saarayo dhul ama hoy ay deggen yihiin.;

**"Go'aanka Ka Saaridda Dhulka ama Hoyga"** waxa uu ula jeedaa go'aanka Guddiga Masuul-ka ka ah Ka saaridda Dadka Dulka and Hoyga ay deggan yihiin uu ku hirgalinayo amar maxkamadeed;

**"Ogaysiiska ka Saaridda Dhulka ama Hoyga"** waxa uu ula jeedaa ogaysiis qoraal ah oo mulkiilaha guriga/dhulka ama hay'adda ku shaqada leh ay siiso qofka deggan dhis-maha ama dhulka oo lagaga dalbanayo in uu dhismaha/dhulka banneeyo amaba isagoo bannaan ku soo wareejiyo muddo cayiman oo ogaysiiska lagu caddeeyay;

**"Amarka ka Saaridda Dhulka ama Hoyga"** waxa uu ula jeedaa amar ay bixiso maxkamadda sare ee awoodda sharci u leh oo mulkiilaha guriga/dhulka amaba hay'adda ka wakiil-ka ah loogu xukumayo in dib loogu soo gacan galiyo guriga, dhulka ama dhismaha uu amarku tilmaamayo in laga saaro shakhsiyaadka, kooxaha ama reeraha ku de-ggan si khilaafsan ogaysiiskii ka saaridda dhulka ama hoyga oo loo bixiyay si waa-faqsan habraacan;

**"Xoog uga Saaridda Dhulka ama Hoyga"** waxa uu ula jeedaa "… shakhsiyaad, qoysas ama reero si rasmi ah ama ku meel-gaar ah oo aan rabitaankooda ahayn looga saaro guryo ama dhul ay degganaayeen iyadoon loo marin amaba fursad loo siin waddo sharci ah," waxaanse taas soo galaynin ".... ka saarid xoog ah oo waafaqsan sharci-ga kuna jaan-go'an qodobbada xeerarka caalamiga ee xuquuqda aadanaha"[1];

**"Barakacayaasha gudaha"** waxa uu ula jeedaa shakhsiyaad ama kooxo ku qasbanaaday in guryahooda ama degaankooda ay uga qaxaan dirir, xaalad guud oo colaadeed, xadgudub xuquuqda aadanaha ah ama musiibo dabiici ah ama aan dabiici ahayn darteed iyagoo aan ka tallaabin xuduudka caalamku aqoonsanyahay ee Jamhuuri-yadda Federaalka ee Soomaaliya.

---

1 Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan, 1967: Guddiga Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan, Sharraxaad Guud lam. 7 ee "Xoog Uga saaridda Dhulka iyo Hoyga, , Xaqa Hoy Waafiya" 1997.

## 2. Xayndaabka iyo Ujeeddada

2.1 Si loo dhawro xaqa hoy waafiya iyo xuquuqaha la halmaala, habraacyadanu waxa uu Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ku waajibinayaa inay ka dheeraato, ayna ka ilaaliso dadka deggan guryaha dawladda amaba gaarka loo leeyahay, dhulalka iyo xeryaha in si xoog ama aan sharciga waafaqsanayn looga saaro.

2.2 Habbraacyadanu waxa ay ku aaddan yihiin saamaynta xuquuqda aadanaha ee dad-ka xoogga looga saaro dhulka iyo hoyga ay deggan yihiin ee ka dhacda miyiga iyo magaalada.

1.3 Habraacyadanu waxa ay bixinayaan tilmaamo iyo hannaan ay tahay in la raaco oo la dhawro si loo xaqiijiyo in aan dadka dhulka iyo hoyga ay deggan yihiin looga saarin qaab khilaafsan halbeegyada xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, Dastuur-ka ku Meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya iyo xeerarka kale ee qoran.

2.4 Habraacyadanu waxa ay abuurayaan nidaam wax ku ool ah oo suurta-galinaya diyaarinta siyaasado, shuruuc, hannaan maamul iyo tallaabooyin ka hortag oo lagu xaqiijinayo in aan dalka hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin xoog looga saarin; iyo in xuquuq sharciyeed oo wax ku ool la siiyo kuwa xadgudubka xuquuqeed uu ugu dhacay in dawladdu ay ilaalin wayday darteed.

## QAYBTA II

## SHURUUDAHA IYO HANNAANKA SHARCIGA AH EE KA SAARIDDA DADKA HOYGA IYO DHULKA AY DEGGAN YIHIIN

**3. Shuruudaha Dhul iyo Hoy ka Saaridda Sharciga ah**

3.1 Ka saaridda dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxaa lagu samayn karaa oo kaliya xaalado gaar ah iyo duruufo lama huraan ah, waxaana la maciinsan karaa oo kaliya marka khiyaar kale ama xal kale oo suurta gal ah aanu jirin.

3.2 Duruufahaas gaarka ah waxa ay jiraan marka –

b. baahi sharciya oo lagama maarmaan ah loo qabo dib u soo ceshadka dhul dawladeed ama dhisme ay deggan yihiin barakacayaasha gudahu;

t. ay daruuri tahay in mulkiile sharci ah loo sugo oo loo soo celiyo xaqiisii lahaansho ama sheegashadiisa dhul ee sharciga ah; ama

j. danguud oo ka muhiimsan.

3.3 Xaaladahaas gaarka ah, in dalka laga saaro hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxa ay sharci noqonayaan haddii –

b. loo fuliyo si waafaqsan Dastuurka, shuruucda kale ee dalka ee khusaysa iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo mabaadi'da lagu xusay habraacyadan;

t. loo fuliyay ujeeddo sharci ah awgeed taas oo ay keentay duruuf muhiima oo lama huraan u ah danta guud ee kiiska taagan;

j. loo fulinayo ayna codsigiisa tahay mulkiilaha sharciga ah ee dhulka ama hay'ad dawladeed, oona la dhawrayo hannaannada ka saaridda dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin ee lagu sheegay Qaybta III; oo

x. la fuliyay markii xal kale la waayay.

## 4. Badbaadiooyinka loo Baahan Yahay Marka Dadka Laga Saarayo Hoyga ama Dhulka ay Deggan Yihiin

Dadka laga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin mar kasta waa in ay u hoggaansanaataa shuruudaha badbaadooyinka soo socda:

b. dadka laga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin ma ahan in shakhsiyaadka, kooxaha ama reeraha ay ka dhigto hoy la'aan ama u nuglayso in laga duudsiyo xuquuqda aadanaha oo ay dammaanad qaadayaan dastuurka, xeerarka kale ee dalka iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;

t. tallaabooyin munaasab ah waa in la qaadaa si loo xaqiijiyo in gabbaad kale loo diyaariyo kuwa aan iyagu diyaarsan karin, gaar ahaan dumarka, caruurta, dadka naafada ah ama qaba xannuunnada daran iyo waayeelka;

## QABYTA III

## HANNAANKA KA SAARIDDA DADKA HOYGA IYO DHULKA AY DEGGAN YIHIIN

**5. Waajibnimada in la Ogaysiiyo Dadka ay Saamaynayso**

5.1. Inta aan dadka laga saarin hoyga ama dhulka ay deggan yihiin, waa in shakhsiyaad-ka, kooxaha iyo reeraha ay saamaynayso la ogaysiiyaa oona lala tashadaa inta han-naanku socdo.

5.2 Marka la qorshaynayo ama la fulinayo ka saaridda dalka hoyga ama dhulka ay de-ggan yihiin, waa in la tixgeliyaa baahiyaha ama danaha gaarka ah ee ay qabaan dadka nugul iyo kuwa la faquuqo oo ay ku jiraan dumarka, caruurta, dadka naafada ah ama qaba xanuun daran iyo waayeelka.

**6. Waajibnimada Ogaysiiska iyo Qaabka Ogaysiiska**

6.1 Inta aan dad laga saarin hoyga ama dhulka ay deggan yihiin, mulkiilaha ama hay'adda dawladeed ee ku shaqada leh waa in ay siiyaan ogeysiis muddo ay ku guuraan oo aan ka yarayn lixdan (60) maalmood dhamman dadka ay si toos ah am-aba si dadban u saamaynayso ka saaridda dhulka ama hoyga oo la maaganyahay, gaar ahaan dadka nugul iyo kuwa la faquuqo ee lagu sheegay faqrada 5.2.

6.2 Ogaysiiska dadka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxa uu no-qonayaa qoraal ah luuqad ay fahmi karaan dadka ay saamaynayso, oo ah qaabka la cayimay oona tilmaamaya –

b. faah-faahinta guryaha ama dhulka qofka deggan laga rabo in uu banneeyo ka hor muddada loo qabtay;

t. sababaha keenay in laga saaro dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin; iyo

j. taariikhda looga baahan yahay in ay banneeyaan hantida ama dhulka.

6.3 arrimaha lagu cayimay faqrada 6.2 waxaa la socda, ogaysiisku wuxuu cidda ay saa-maynayso ku wargalinayaa waddooyinka sharci ee u furan in ay qaab sharci ah uga horyimaadaan ama racfaan ka qaataan go'aanka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin.

6.4 Ogaysiiska looga saarayo hoyga ama dhulka uu deggan yahay waxaa loo gaynayaa xilli maalin cad ah oo aan habeen ahayn, waxaana si muuqata loogu soo bandhi-

gayaa meel u furan dadwaynaha oo ay ka arki karaan, gaar ahaan kuwa sida tooska ah ama dadban ay ka saaridda hoyga iyo dhulku u saamaynayso.

6.5 Haddii ay khusayso barakacayaasha gudaha, waxaa ogaysiiska looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin gaarsiinaya mulkiilaha, wakiilkiisa ama hay'adda shaqadaas qaabilsan (hadba sida xaalku yahay); wixii ogaysiis ka saarid hoy ama dhul ah ee ay bixiyaan horjoogayaasha xeryaha ama deegaannada barakacayaasha ma noqonayso loomana aqoonsanayo ogaysiiska uu ka hadlayo habraacani.

## 7. Xaqa Tallaabo Maamul oo Caddaalad ah, Dib-u-eegis Garsoor ama Racfaan

7.1 Qof kasta oo si toos ah ama si dadban ay u saamaynayso ka saaridd dhul ama hoy uu deggan yahay oo la soo jeediyay waxa uu xaq u yeelanayaa –

b. tallaabo maamul oo deg-deg ah, beekhaansan, sharci ah, macquul ah oo hannaan ahaanna ah tallaabo maamul oo caddaalad ku salaysan;

t. in la siiyo qoraal ay ku caddahay sababaha loo cuskaday ka saaridda hoyga ama dhulka uu deggan yahay oo la damacsanyahay; iyo

j. in maxkamad darajada koobaad ah ay dib-u-eegis ku samayso sharcinimadka ka saaridda hoyga ama dhulka uu deggan yahay.

7.2 Haddii qof ama koox ay dalbato xaqa lagu siiyay faqrada 7.1(c), ogaysiiskii lagu bixiyay si waafaqsan habraacyadan waa la hakinayaa fulintiisa illaa inta garsoorka ay khusayso uu arinta sharci ahaanteeda go'aan ka gaarayo.

7.3 Qof ama koox lagama saari karo hanti dadwayne ama mid gaar loo leeyahay iyadoo maxkamadi aanay oggolaan ka saariddaas; qofkii ku kaca ka saarid hoy ama dhul isagoo aanan haysan amar maxkamadeed wuuxuu galay dambi uu sharcigu ciqaabayo.

7.4 Amarka dadka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxa uu lahaannayaa tilmaamo faah-faahsan oo sheegaya xaqa racfaanka, kaas oo ay ku caddahay maxkamadda heer federaal ama dawlad goboleed ama maamulka Gobolka Banaadir ee racfaanka loo qaadanayo, waxaana arrintaas lagu caddayn doonaa sharci sida uu qabo qodobka 105(2) ee Dastuurka ku Meel-gaarka ah.

7.5 Amarka maxkamadeed ee ogolaanaya go'aanka dadka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waa in uu sheegaa xilliga ay tahay in qofka deggani ama u kiraysanyahay uu banneeya dhismaha ama dhulka; xilligaasu kama yaraan karo lixdan (60) maalmood oo ka bilaabmaysa maalinta ay maxkamaddu bixisay amarka

amaba iyaga loo sheegay natiijadii racfaanka.

**8. Xaqa Kaalmo Sharci iyo Xog**

8.1 Qofka ama kooxda ay si toos ah ama si dadban u saamaynayso ka saaridda hoyga ama dhulka la damacsanyahay in la banneeyo waxa ay xaq u yeelanayaan kaalmo sharci iyo xog si loo fududeeyo-

b. helitaanka xaqa dib-u-eegis garsoor iyo tallaabo maamuul; iyo

t. u racfaan qaadashada garsoorka si looga dacwoodo sababaha iyo hannaanka ka saaridda hoyga iyo dhulka loo maray.

8.2 Waa waajib saaran maamulka ama hay'addii kale ee ku shaqo leh in ay dadka ay saamaynayso ka saaridda hoyga iyo dhulka la siiso xog sax ah oo waqtigeedii lagu soo gudbiyey oo u xaqiijinaysa xilliga ka saaridda hoyga ama dhulka ay dhacayso iyo hannaanka la marayo; go'aanka ku saabsan xilliga iyo hannaanka waxaa lagala tashanayaa dadka arrinkaani saamaynayo, haddii barakacayaasha gudaha yihiinna waxaa kale oo lala tashanayaa Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha ama Dawlad Goboleedka iyo Maamulka Gobolka Banaadir, ama hay'addii kale ee ku habboon.

**9. Unkidda Guddiga ka Saaridda Hoyga iyo Dhulka**

9.1 Waxaa la unkay guddi heer federaal ah oo lagu magacaabayo "Guddiga ka Saaridda Hoyga iyo Dhulka" kaas oo masuul ka noqonaya hirgalinta amarrada maxkamadaha oo dadka looga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin ee lagu bixiyo habraacyadan, waxaana guddoomiye ka noqonaya wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalaynta iyo Dib-u-heshiisiinta.

9.2 Guddigu waxa uu ka koobnaanayaa min hal wakiil oo ay soo kala magacawdaan hay'adaha hoos ku xusan oo uuna ansixiyo Ra'iisul Wasaaruhu:

b. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Faderaalaynta iyo Dib-u-heshiisiinta;

t. Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u dhiska iyo Guriyaynta;

j. Wasaaradda Haweeka iyo Hormarinta Xuquuqda Aadanaha;

x. Wasaaradda Caafimaadka;

kh. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;

d. Wasaaradda Waxbarshada;

r. Wakiil Booliska;

s. Hal wakiil oo ka socda ururrada buulshada; iyo

Intii ay suurto-gal ka tahayna laba xubnood ama ka badan laga dhigo dumar iyo dadka naafada ah.

9.3 Haddii ka saaridda hoyga ama dhulka ay khusayso xeryaha ama deegaannada barakacayaasha gudaha, go'aanka lagu hirgalinayo amarka maxkamadda ee ka saaridda hoyga ama dhulka waxaa soo saaraya guddiga lagu unkay si waafaqsan faqradda 9.2.

9.4 Haddii ka saaridda hoyga ama dhulka ay ka dhacayso Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka (DXDF) ama Maamulka Gobolka Banaadir (MGB), go'aanka dadka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxaa gaaraya guddi ay hogaaminayso oo guddoomiyana u tahay wasaaradda arrimaha gudaha ee dawlad goboleedkaas ama wasaarad ama hay'ad kale oo ay leedahay DXDF /MGB ama waaxdiisa u xil-saaran soo saarista go'aanka dadka looga saarayo hoyga ama dulka ay deggan yihiin. Guddiga ka saaridda hoyga iyo dhulka ee DXDF waxa uu ka koobnaanayaa wasaaradaha lagu xusay faqrada 9.2 oo laakiin heer DXDF ah.

9.5 Haddii ka saaridda hoyga iyo dhulka uu saamaynayo barakacayaasha gudaha, masuuliyiinta lagu xusay faqrada 9.2 iyo 9.4 waxaa intaynan gaarin go'aanka dadka looga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin ay la tashanayaan Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha iyo Wasaaradda Aadaminimada iyo Maaraynta Musiibooyinka, ama hay'addii kale ee ka masuul ah barakacayaasha gudaha.

9.6 Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxa ay samaysan karaan guddi ka saarid hoy iyo dhul oo lamid ah kan ku xusan farqada 9.1iyo 9.2 oo ka howlgala deegannada ay ka taliyaan oo heer hoose oo maamul ah.

9.7 Masuuliyiinta lagu xusay faqrada 9.2 iyo 9.4 waxa ay iska dhex-magacaabayaan masuul shakhsiyan uga masuul ah kormeeridda hannaanka dadka looga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin si waafaqsan hab-raacyadan.

**10. Hannaanka ka Horreeya inta aan Dadka laga Saarin Hoyga iyo Dhulka ay deggan Yihiin**

10.1 Ka hor inta aan la qaadin wax tallaabo ah oo lagu hirgalinayo amarka maxkamadda oo dadka looga saarayo hoyga ama dhulka ay deggan yihiin, guddiga ka saaridda hoyga iyo dhulka isagoo la tashanaya dadka ay saamaynayso amarka maxkamaddu ayuu ka baaraandagayaa dhammaan khiyaarada suurta-galka ee lagu bannayn karo guriga ama dhulka iyada oo aan xoog la adeegsan.

10.2 Ka sokow waajibka lagu sheegay faqrada 10.1, guddigu waxa uu dejinayaa tallaabooyinka munaasabka ah ee ay tahay inay qaadaan hay'adha kala duwan ee dawladdu si loo dhawro xuquuqaha shakhsiyaadka, kooxaha iyo reeraha ay saamaynayso ka saariddu, si waafaqsan qaybaha II iyo III. Haddii barakayaasha gudaha ay saamaynayso ka saaridda hoyga iyo dhulka, ka hor ka saaridda hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin isaga oo la tashanaya bara-kacayaasha guduha iyo reeraha degaanka ayuu guddigu u astayn gabbaad ku filan, waxa uuna tixgelinayaa baahida gaarka ah ee ay qabaan dumarka, caruurta, dadka naafada ah iyo waayeelka.

10.3 Hirgalinta amarka maxkamadda oo dadka looga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin sharci darro ayay noqonaysaa haddii aanay wehelin go'aan lagu hirgelinayo oo ay soo saareen guddiga ka saaridda dadka hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin si waafaqsan habraacyadan.

**11. Hannaanka Marka Lagu Gudajro Ka Saaridda Dadka Hoyga iyo Dhulka ay Deggan Yihiin**

11.1 Marka lagu gudajiro ka saaridda dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin, hay'adaha lagu xusay faqrada 9.2 iyo 9.4 ee Qaybta III waa inay goob joog ahaadaan marka la samaynayo falka ka saaridda; dhammaan dadka ku mashquulsan ka saaridda dadka hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin waa in si dhab ah oo qeexan loo garanayo hawsha ka hor iyo ka dibba.

11.2 Ka saaridda dadka hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin looma samaynayo si wax u dhimaysa sharafta qofka, xaqa asaasiga ah ee nolosha iyo xaqa asaasiga ah ee nabad-galyada shakhsiyaadka ay saamaynayso.

11.3 Ka saaridda dadka hoyga ama dhulka ay deggan yihiin lama hirgelin karo xilli aan hawadu wanaagsanayn, habeen, maalmaha ciidaha ama xilliga imtaxaanaadka iskuulka ama in yar uun horteed.

11.4 Marka dadka laga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin waxaa saraakiisha boo-

liska iyo kuwa kale oo sharci fulinta ka reebban adeegsiga xoog, marka laga reebo xoog xaddidan oo lama huraan u ah fulinta in dadka laga saaro hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin, waxayna dadka ay saamaynayso ka difaacayaan in cid kale ay xoog u isticmaasho.

11.5 Dhammaan saraakiisha booliska iyo kuwa kale ee goob-joogga ah marka dadka laga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin waa in lagu aqoonsan karo magacooda oo si la akhrin karo loogu suntay meel dharkooda ka mid ah oo si toos ah u muuqata.

11.6 Waa dambi sharciyan la isku ciqaabayo in dadka hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin xoog loo dumiyo ama loo baab'iyo degaan iyadoo cidda ay saamaynayso aan la siinin waqti ku filan oo ay ku gurato, la baxdo oo ay meel kale ku gaysato hantidooda guurtada ah.

11.7 Kuwa fulinaya dadka laga saarayo hoyga iyo dhulka ay deggan yihiin waxa ay tixgelinayaan in dadka ay saamaynayso ay ku jiri karaan shakhsiyaad, kooxo ama reero sababo caafimaad aan u guur-guuri karin amaba dad naafo ah.

## 12. Hannaanka marka Dadka Hoyga iyo Dhulka ay Deggan Yihiin laga Saaro ka bacdi

Ciddii ay saamayso ka saaridda hoyga ama dhulka ay deggan yihiin waxa ay xaq u leedahay helid xuquuq sharci ah oo lagu saxayo wixii dhacay oo wax ku ool ah iyo kaalmo sharci. Haddii ay khusayso barakacayaasha gudaha, Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Gudaha (HQQB) ayaa ka caawinaysa sidii ay ku heli lahaayeen xuquuqaha ay dhawreen habraacyadani oo waafaqsan Qodobka 5(1) ee Sharciga Unkidda HQQB (Sharci L. 2 ee 2016).

## QAYBTA IV

## QODOBBO GUUD IYO KUWO QUBANE AH

13.1 Habraacyadani waxa ay dhaqan-galayaan marka uu ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

13.2 Haddii iyo markii ay baahi timaaddo, Golaha Wasiirada ee Jamhiiriyadda Federaalka ayaa habraacyadan ku samayn kara dib-u-eegis, wax ka baddalis iyo baddalisba.

Taariikh ------------------------------------ / ----------------------------------- /2019

SIXIIXAY:_____________________________

Raysul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya